# Masayrkii dilaaga ahaa


## W/Q: Fadumo M. Alimaad (Samo)




MASAYRKİİ DİLAAGA AHAA!. Q:1AAD

Waxa aan ayada oo roob da'ayo, makhrib ay tahay, funaanadii aan qabayna ay igu qoyday aan kusoo leexday meel qaxwaha iyo cabitaanka lagu cabbo oo wadada dhinaceeda ah. Albaabka markii aan saas uga soo galay ayaan isha ku dhuftay isaga oo la fadhiya gabadh kale, afkana ka tirtiraya, wadnaha ayaa igu dhawaaday in uu shaqada joojiyo shoogii aan ka qaaday, daqiiqado yar kahor ayuu igu lahaa markii aan taleefanka ka wacay "Waa aan xanuunsanayaa oo maanta dibadda uma soo bixin. "Aniga oo bartii taagan eegayana wali oo rumaysan la' waxa indhahaygu arkayaan ayay inta naagtii qaaday xabad buskut ah oo ku jirtay saysar hortooda yaallay afka u galisay, markii uu afka kala qaaday si uu u jabsado ayuu indhaha igu dhuftay, aniga oo arkaya ayay indhihiisii u ekaadeen kuwa aan shaqaynayn. Maryahayga oo qoyanaa darteed waxaa iga dhibcayay biyo, dhulka ayay dhibic dhibic ugu dhacayeen aniga oo hoos u eegaya dhibcaha biyaha ee surweelkayga ka da'aya ayaan arkay dhibic wayn oo illin ah oo ishayda kasoo dhacday oo dhulka ku tibiqday. Lugta ayaan saaray meeshii ay illintu ku dhacday horay ayaan usii dhaqaaqay oo waxa aan u jihaystay dhanka suuliga.

Wali waa uu i eegayay isaga oo malaha ka dhursugaya ficilka aan samayn doono. Suuligii ayaan galay, waxa aan xoogaa iska qallajiyay biyihii, muraayadda ayaan wajigayga ku eegay mise aad baan u dhalaalayaa kaliya indhahayga ayaa illini ka buuxdaa!. indhakuul iyo rooseeto ayaan kala soo baxay boorsada, illintii inta aan ka qalajiyay ayaan si qurux badan kor iyo hoosba uga mariyay daliig madow oo siman! Aniga ayaaba ka helay marka uu is dhex galay caddaanka ubucda ishaydu iyo madowgii indhakuushu. Bushimahaygii oo aan mariyay kalar gaduud xigeen ah ayaan muraayadda u dhoolacadeeyay mise ilkahaygii xad-dhaafka u cadcadaa xoogaana yara qasnaa waxa ay rooseetadu u yeeshay soo jiidasho xad dhaaf ah. Timahaygii oo markii hore kor isugu xirnaa roobkuna yara qooyay ayaan furay, waxa ayba yeesheen jacdad rabbaani ah oo u siyaadiyay qurux dheeri ah! illaa garbaha ayaan sidaas u sayriyay aniga oo laafyoonayana albaabkii suuliga ayaan kasoo baxay.

Aniga oo isleh waa ay baxeen ayaan soo baxay mise meeshoodii bay fadhiyaan isaga gacantiisa oo korsaarnayd gacanteeda oo miiska saaran ayaan eegay, waa uu jaraynayay sidii qof qarqaryo darani hayso. Waxa aan istaagay qeybta dalabka laga dhiibto waxa aan dalbaday labo koob oo

kafee  aan waxba lagu darin ah. waxa aan fariistay kursi ku aaddan ayaga isaga wajigiisana ku beegan! gabadhu aysan i arkayn ee uu isaga oo kali ahi i eegi karo.

kafeegii marka la ii soo dhigay ayuu ninkii kabalyeeriga ahaa iisoo dhigay bahasha sigaarka lagu damiyo isaga oo i leh waqti wacan qaado.

Xilligu waa xilli qabow dadka badankooduna sigaar ayay cabayaan oo ay dhaxanta iskaga kicinayaan. Maba xasuusnayn in aan sigaar cabi jiray ee ninkii baa i xasuusiyay, waxa aan ka eegay boorsadayda bal in aan soo qaatay baakadkaygii markii aan soo baxayay. Nasiib wanaag waa aan watay.

Labada lugood ayaan isku korsaartay si is dhaaf ah, indhahayguna isaga indhihiisa ayay ku beegnaayeen, waxaa ii muuqanayay faraheeda oo garkiisa salaaxaya marmarna afka buskud u galinaya. İsagu waxa uu u muuqday qof aan aad ula dhacsanayn, marka aan leeyahay aan aad ula dhacsanayn kama wado gabadha ayaa uusan la dhacsanayn ee waxaa khalkhal ku ridday marxaladaan uusan filayn. Sigaarkii ayaan daartay, naqaska ayaan hadba jiidaa aniga oo dhankiisa usoo tufaya, si kasta oo uu iskugu dayo in uusan isoo eegin oo uu indhihiisa ku jeediyo gabadha hortiisa fadhida haddana waa uu ku guuldarraysanayay. Koobkii koowaad oo kafeega ahaa ayaan dhamaystay, markaas baan ninkii kabalyeeriga ahaa gacanta u taagay, aniga oo cod xoogaa la maqli karo ku leh, "Kafeegaan waa uu qaboobaye iga qaad, qof ayaan u dalbay qofkii baa kasoo habsaamaye, aniga igu qor lacagtiisa kadibna daadi, anigana mid kulul ii keen hadda". Si yaab leh ayuu wali ii eegayay, ma aqaan in uu fahmay macnaha hadalka aan ka waday iyo inkale danse kama aanan lahayn fahankiisa.

Gabadhii baa kacday oo u dhaqaaqday dhanka musqusha, Hoos ayuu eegay oo uu taleefankiisa isku mashquuliyay malaha waxa uu u qabay in aan u imaan doono, aniga oo masayrsan ama waydiinaya waxa ay naagtani ahayd. Xabad kale oo sigaar ah ayaan ku shitay isla fadhigii, waxaa ii yimid kafeegii waan cabay isaga oo sidii u kulul. Waan hubaa oo niyadiisa waxaa ka guuxaysay maxay kula damacsantahay?! Waa ninkee ninka aan sidaas u fakarayn marka ay horfadhido saaxiibtiisii ay dhowrka sano xiriirka lahaayeen isaga oo la fadhiya naag uu hoosta ka shukaansado. Dabci ahaan waxa uu igu ogaa in aan ahay qof aad u masayr badan, marwalba oo ay ku aragto wax khaldanna aan ka aamusine dhahda waxaan aad samaysay kama heline maxay yihiin ii sharrax! Falcelintaydu waxa ay ku noqotay wax uusan maarayn karin, caqligiisana ka wayn. Gabadhii marka ay saas usoo fariisatay ayaa Albaabka waxaa kasoo galay, wiil kale oo aan korka iska garanaynay balse aysan isku dhawaansho saas ahi naga dhaxayn, sidii uu usoo socday ayaa uu i yidhi "Samo, kaligaa baad fadhidaaye ma lagula fariisan karaa?". inta aan u dhoola

caddeeyay ayaan labadaydii lugood oo isa saarna inta kala dajiyay tii bidix waxa aan sidaas ugu durkiyay miiskii dhinacayga yaallay aniga oo leh soo fariiso. Wiilkii marka uu soo fariistay isagu waxa uu arkayaa aniga oo wiilka wajigiisu uma muuqdo sidii aniguba aanan u arkayn wajiga gabadha.

Niyadda ayaan iska idhi "Marka nimanka aad naftaada u hibaysid ay ku xumeeyaan, maxay si kadis ah ugu soo baxaan kuwo booskooda lagu baddali karo!". Haddana intaan niyadda ka qoslay baan idhi "Waaba sababtaas sababta nimanka badani u jiraan, haddii kale waxaa lagu khasbanaan lahaa in meel loogu xirnaado kan qalbigaaga jabiya".  kabalyeerigii ayaa markale yimid oo wiilkii ka qaaday dalabka markaas baan anigu mid saddexaad u dirsaday! Aniga oo lasoo baxaya sigaarkii 3xaad ayaan wiilkii inta usoo taagay baakadkii idhi ma cabbaysaa?! intuu qoslay buu yidhi "Anigu ma cabbo sigaarka." Niyadaan iska idhi waa nin noocee ah ninka aan sigaarka cabbin, waxbase igama qusayne waan shitay, waxa aan arkayay in uu dhibsanayo sigaarka aan ku cabbayo meesha inkasta oo dadka meesha ku jira oo dhami wada cabayeen. Aniga oo kalabar marinaya ayaan damiyay ixtiraam aan u muujinayay dartiis! İxtiraamse igama ahayne inta uu u adkaysan waayo in uu iga agkaco ayaan ka cabsi qabay.

Kafeegii markii sidaas loo soo dhigay, ee uu ninkii kabalyeeriga ahaa dhinacayga usoo durkiyay koobkii ayaan qaado is idhi qaadashadii aan qaatay, ayaan marka uu la simanyahay bowdyahayga sii daayay! Kas miyay iga ahayd, kama' miyay ahayd mise masayrka iga batay baa sababay ma kala qeexi karo! Qeyladii aan qayliyay dadkii oo dhan baa isoo wada eegay, waan gubtay oo si daran baan u gubtay, qofkii ugu horreeyay oo dhankayga soo eega waxa uu ahaa Ninkii sababta u ahaa in waxani igu dhacaan ee naagta la fadhiyay. Wiilkii ila fadhiyay isagana lama filaan bay ku noqotay oo waa uu naxay, gacanta ayuu i qabtay isaga oo dhanka suuliga ii waday si'aan biyo qabow ugu soo shubo! Marka aan usii dhownahay Albaabka suuliga ayaa waxa aan dareemay qof igu dhagay gacanta oo ileh anaa ku wadaya! Anoo ka naxay oo aan filayn baan dhankiisa inta u jeensaday idhi "Maxaa rabtaa adiguna?" intaas markii aan idhi ayay naagtii oo daba ordaysaa tidhi "War maxaa kaa khaldan, soo aniga ilama aad socon?". "Jawaab kuma siin karo" ayuu si deg deg ah u yidhi. Wiilkii aniga ila fadhiyay iyo gabadhaan maskiinta ahiba meesha waa ay ku wareereen Aniga iyo İsaga oo kali ah ayaa ogayn waxa isu sawiray ee uu usoo cararay markii aan suuliga gali rabnay!.

MASAYRKİİ DİLAAGA AHAA. Q:2AAD

Wajigiisa oo jaahwareer faro badani ka muuqdo ayaa uu isku dayay in uu igu qanciyo in aanan ninkaan raacin ee uu isagu noqdo cidda suuliga ii raacaysa. si yasmo leh ayaan ugu idhi "Adigu miyaad i garanaysaa aniga?!" marka aan intaas idhi ayaa wiilkii oo markii hore naxsanaa una qabay in ninkaani yahay qof aniga wax igala dhexeeyaan ayaa isaga oo dhiiran yidhi "Niyow raggu in uu kala xishoodaa fiican, gabadh ninkii ay la socotay garab taagan yahay, in aad khash-khashaado waa wax aan sharciyada ragga lagu aqoon ee maxaan kaaga xisaabtamaa?!."

Marxaladaas anigu waxa aan ku dhawaa in aan qosol dhulka ku faniino marka aan xasuusto wajigiisii, isagii ayaa aan ka dhigay qof aanan aqoon oo gardarro in uu igu raaco diyaar u ah, miyaan samayn kari lahaa wax intaas ka cajiibsan oo aan uga aarguto?!. Gabadhii ayadu waa dumar xishood baas baa ku jira, waxa ay dareentay in ninkii dhamaa ee ay soo raacday uu dadka dhexdooda uga dhaqaaqay kana daba galay naag uu bartamaha suuqa ku arkay! nasiib xumo ma ay ogaan in aan inkiray oo ayada oo u qabta in uu i garanayo ayay meeshii ka huleeshay!. Markale ayuu ma quusane i yidhi, "Samo ma kaa dhab baa waxaan aad samaynayso? waad aragtaa in aad gubatay una baahan tahay in aad biyo qabow isku shubtide ina mari?." miyuu waalan yahay miyaanan ahayn naagtii uu horteeda waliba isaga oo aan waxyar oo khajilaad ahi ku jirin uu naagta ku shukaansanayay? miyaanan ahayn naagtii uu iska indho tirayay indho adakaa sidee ayaa uu hadda ugu dhiiraday in uu ii sheego in aan waxaas oo dhan iska illoobo.

Gacanta ayaan qabsaday wiilkii kale ee ila fadhiyay markii hore, magiciisii xataa si fiican uma xasuusto sababta oo ah noocayga maahayn, jinkayguna waaba uu necbaa aragtidiisa iyo marka aan isaga soo horbaxno agagaarka jaamacadda, marxaladii aan markaas ku jirayse waxa aan ula dhaqmayay siduu in uu yahay dheeman dhulka laga helay. saaxiibkay isaga oo na eegaya baan sii dhaafnay miis meesha yaallay oo aan galnay albaabkii suuliga! suuligu dhawr qeybood ayuu ahaa oo albaabka marka aad kasoo gasho ayaad soo istaagaysaa meel muraayado ku yaalaan, qolalkii suuliyaasha albaabadoodiina taxan yihiin. mid kamid ah ayaan galay, isaguna meeshii dhexda ahayd ayuu igu sugayay. waanba iska illoobay kulaylkii qaxwaha inkastoo aan gubtay oo halkii surweelku ka haystay jidhka markii bunku ku daadanayay ay biyo yari galeen aadna ay u casaatay haddana waxaas oo dhan waxaa igala xanuun badnayn aragtida saaxiibkay aan ku arkay isaga oo naag kale hortayda kula haasaawaya waxnana aan ka oran kari waayay aniga oo ixtiraamaya quruxdayda iyo kibirkayga, waayo dunidaan ma saarna naag u qalanta in aan darteed u dareemo daciifnimo horteedana nin ku jiid-jiido.

Markii aan sidaa suuliga u galay ee aan dharkii iska saaray si'aan meesha iskaga mayro ayaa waxaan dibada ka maqlay shanqar iyo qaylo. codadka si fiican uma aanan kala sixi karine waan dareemay in uu kii soo galay oo uu samri kari waayay!. Aniga oo dareemaya sidii in aan ahay atariisho ku jirta filimka loogu daawashada badan yahay kibir faro badanna korkayga laga dheehanayo ayaan kasoo baxay suuligii mise waa labadoodii oo is ag-taagan!. İnta aanan hadal oran ayuu saaxiibkay i yidhi "Gacaliso wax walba oo dhacay, waa la xallin karaa! khaladaadkayga waan ogahay, hadiise aad adiguna iga daba khaldanto waxa aan hubaa in xiriirkeennu gaarayo meel aan waxba laga qaban karin ee fadlan hadalkayga dhagayso". Marka aan intaas maqlay ayaan ku dhawaaday in aan halmar habsiiyo inta ku boodo. aan isu xanaajiyo si xunna aan ula dhaqmee haddana waan jeclahay, wax kasta ayaan ka jeclahay oo uma quuro daqiiqad in aan dhibo. Wiilkii kale oo hadda fahmay meesha salaaddu ka xirmi la'ayd ayaa yidhi, "Samo, maxaa kaa si noqday, ma sidaas oo dhan ayaan kuula liitaa?" Xoogaa baan xasuustayda dib u celiyay maxaan ku sameeyay ninkaan, maxaanse ku bahdilay!. isaga ayaa isoo garab fariistay hadal dabacsan oo aan idhina ma xasuustee aniga oo usoo dhaqaaqaya dhanka saaxiibkay ayaan idhi "Walaal, iga raali noqo inkasta oo aanan  wax khalad ah kuu gaysan, haddana wiilkani waa ninka aan dhawaan isguursan doonno." İsaga oo aan hadal kale i odhan aadna u dheeraynaya ayuu ka baxay musqushii. sidaa marka uu u baxay ayuu kii igu soo booday, laabta ayuu i galiyay isaga oo i raali galinaya intaase raalli kuma aanan noqone, annaga oo wada soconna ayaan usoo qaadannay taksi xaafadayda oo ku taalay, Taksim İstanbul.

Marka uu taksigii soo istaagay albaabka gurigayga ayaan is idhi dag, markaas buu inta gacanta igu dhagay i yidhi "Wax walba oo dhacay waan kaa raali galinayaa waxa ay ahaayeen khalad si kadis ah iiga dhacay dibna uguma laaban doonee." inta aanan u jawaabin ayuu ninkii taksiga yidhi " sizin adresiniz burada değil mi?" oo uga jeedo miyaysan halkani ahayn meeshaad ku dagi lahaydeen, markaas buu isagii u jawaabay oo uu yidhi, "Aniga ayaad i gaynaysaa meel kale wax-yar i sug." Anigiina waan soo dagay waxa aan ku idhi, "Raalli ayaan kaa ahay, kaamana xanaaqsani wax walbana dhexdeenna caadi ka dhig, kasoo qaad caawa in aysan ba dhicin". Sababta aan hadalkaa u idhi waxa ay ahayd in anigu aanan doonayn in aan u muuqdo qof maskiin ah oo xaqiisa la duudsiyay, si fududna la rabo in loo raali-galiyo. Qolkaygii yaraa ayaan soo galay aniga oo u jaraynaya sida in aan ku dhex jiro taalagad baraf ah, dhiigayga gudahuna uu u karkarayo sida saliid dab karaya ka taagan.

*****

Asbuuc ayaa kasoo wareegay habeeenkii foosha xumaa, raadxun ayuuse iiga tagay. waan illoobi kari waayay waxa ay ila noqotay sidii in ay arrintaasi dabcigiisa tahay oo uu marwalba sameeyo taasina tahay tan ugu yar ee aan ku qabtay, waxa ay maskaxdaydu iswaydiisay immisa ayaa u qarsan, immisa ayaadan ogayn, immisa ayaa ayaguna u qaba in uu yahay jacaylkooda koowaad?.

Aniga oo sidii xaaladaydu u murugsan tahay isagana u muujiya wajiga ugu quruxda badan. ayaa waxaa ila soo hadashay hooyaday Mazaa. wax-badan ayaan ayada uga tiirsanahay oo waa ayada halka aan ka bartay dhaqanka ah in aan nimanka la tusin waxa aad u qabtid taasina ay adiga kugu noqonayso wax hoos kuu dhiga. waa xabashiyad, nafteeda ku tiisan kalsooni faro badanna ku qabta naagnimadeeda. Aniga oo 8jir ah ayaan bartay. Bartay waxa aan ka wadaa xilligaas ayaa iigu horraysay aragtideeda, Ayada iyo Aabbahay Addis ababa ayay isku guursadeen 1995 inkasta oo markaas reerka Aabbe si xad dhaaf ah uga soo horjeedeen guurkooda haddana nasiib xumo maba uu sii waarin guurkaasi oo Aabbe ayaa si kadis ah ku dhintay aniga oo sannad jir ah. wixii markaas ka dambeeyayna waxaa isoo qaatay Adeeraday oo waxaa la ii keenay Ayeeyo oo sidaas igu korsatay. Jigjiga ayaan ku qaatay noloshaydii intii ugu badnayd haddana barashadeedii kuma khasaarin oo waxa aan ka bartay dhaqan wax badan ka duwan dhaqankii eedooyin iyo islaamihii xaafadeenna aan ku aqaannay. Ayagu wax walba waxa ay ka eegi jireen dhanka dhaqanka iyo waxa uu ka qabo ayaduse sidaa maahayn oo dhaqanka xabashida waxa ay meel iska dhigtay markii ay guursatay nin ajnabi ah . taas oo go'aamisay in ayba marwalba guursato nimanka aan ahayn kuwa qowmiyadeeda. Hadda waxa ay Los angles kula nooshahay ninkeeda oo ah African-American asalkiisu jamaykaan yahay.

Way isoo wacday waxa ayna ii sheegtay in ay 2asbuuc kadib İstanbul iigu imaanayso oo ay doonayso in ay ila qaadato waqti farxad iyo damaashaad ah, rabtana in ay i siiso jacaylkii aysan yaraantaydii isiin madama la i guursanayo oo guurkayga bilo oo kali ahi ka dhiman yihiin.

MASAYRKİİ DİLAAGA AHAA!. Q:3aad

Aniga oo hurda ayuu isoo wacay. Roob faro badan ayaa da'ayay, dhulkana waxaa daadsanaa haraadiga barafkii habeen hore dhulka oo dhan wada caddeeyay. Codkiisa si faseex ah uma aanan maqlayn oo waxa aan dareemayay in uu ku dhex jiro jawi neecaw faro badani ka jirto. Waxa uu ii sheegay in uu taagan yahay albaabka dabakha aan anigu qeybta ka daganahay. Aniga oo yaaban ayaan idhi "Maxaa dhacay oo xilligaan habeen barka ah kusoo waday, miyaadan arkayn sida wajigu u xunyahay." Cod deg-degsiimo faro badani ku jiro ayuu igu yidhi "Albaabka hoose iga fur si'aan kuugu soo galo waxa aan doonayaa in aan si deg-deg ah kuugu sheego arrin soo korortay."

Halmar ayaa wadnaha waran la igaga taagay. waxa aan garan waayay waxa ay noqon karaan waxa soo kordhay ee uu doonayo in uu xilligaan saqbarka ah ii sheego? maxay noqon karaan waxa uu subaxa la sugi waayay sababayna in uu igu soo guureeyo?. Waxa aan qabay bijaamadii hurdada oo uma aanan diyaarsanayn in aan cid qaabilo, deg-deg ayayse igu ahayd in aan dharka badasho inta uu jaranjarada soo fuulayo. İntii aanan u dhaqaaqin dhanka armaajada ayaa waxa ay niyadaydu halmar i tidhi BAL MAAD YARA DHUGATİD DAAQADA OO AAD EEGTİD SİDA JAWİGA BANAANKU YAHAY. Marka aan sidaa u istaagay daaqadii ayaa indhahaygu waxa ay qabteen isagii oo ay gacmaha ku dhagan-tahay qof dumar ahi. markii hore humaagta waan ka yara shakiyay oo si wanaagsan uma aanan sixi karin in uu isagii yahay. wadada oo layrar badan oo casi ku teedsanaayeen ayaa ii sahashay in aan aqoonsado in uu isagii yahay. Aniga oo wadnahaygu u garaacmayo sidii oo la ii sheegay in ay hadda toogashadaydii tahay, amase aan taaganahay duugta qofkii aan dunida ugu jeclaa ayaan inta gacmaha laabta saaray aan aayar naftaydii ugu idhi "Samo, xasiloonidaada ilaasho. Cidina ma mudna in ay khal-khal galiso deganaanshahaaga nafeed." intaas ayaan ku celcelinayay aniga oo naftayda la hadlaya kuna sasabaya in ay wax walba noqon karto ayse sugto inta ay kala ogaanayso waxa meesha ka jira.

Naftii waa ay iga yeeli wayday hadaladii raqiiska ahaa ee aan isku dayayay in aan ku dajiyo. waxa aan is arkay aniga oo bijaamadaydii qaba aniga oo orod uga degay jaranjarada horna taagan, saaxiibkay iyo gabadhii ay murmayeen. Haddii aan sidaas uga soo baxay albaabkii oo aan idhi "Maxaa meesha ka jidha?" waxaa isoo eegtay gabadhii oo wajigeeda badankiisa ay ku dadan yihiin timaheedii oo roobku qooyay waxa ay qabtaa garan madow iyo surweel ah nooca lugaha ka ballaaran. Marna ma arag ayada oo noocaas u labbisan saaxiibtay Amleset. Waa saaxiibtaydii qurbaha waxa aan is barannay aniga oo ku cusub dalkaan 7sano kahor. Waa qofta aan ka heli jiray jacaylkii aan u hayay hooyaday iyo qoyskeeda. Marka aan ayada la joogo waxa aan dareemi jiray in aan xabashiyad ahay in ka badan inta aan soomaalinimada dareemo. Sannadkii ugu

dambeeyay waxa ay ka ciyaari jirtay makhaayada xabashida ee istanbul ku taalla. Halkaas ayaan badanaa aniga iyo saaxiibkay ku booqan jirnay. Marmar xataa waxa ay igu casuumi jirtay in aan masraxa koro oo aan soo bandhigo ciyaar dhaqameedka yar ee aan ka garanayo dhaqankayga. Xasuustayda marna masoo galin amleset ayaad kala kulmaysaa wax qalbigaaga jabiya iskadaaye habeen kuma seexan in ay igu samayn karto wax naftaydu dhibsato. Alla maxaan maskiin ahaa waxa aan la wadaagi jiray wax walba oo aniga iyo isaga dhexdeenna ah. mararka qaar waxa aan uga sheekayn jiray sida uu ugu wanaagsan yahay dhan walba illaa iyo xadkaas ayaan ahaa mid aan xumaan dhan filanayn.

Wajigeedii oo aan si wacan loo arkayn timaheedii jacdadnaana ay ku daadsan yihiin ayay halmar dhankayga soo jalleecday. Anigu wali ma fahamsani waxa meesha ka jira waxa aan iswaydiinayaa maxaa khaldan oo labadoodaba saacadaan ku kulmiyay albaabka hore ee gurigaaga. İntii aysan ayadu hadal i oran ayuu isagii dhankayga usoo dhaqaaqay inta uu labada gacmood  i qabtay sidii in uu dhankiisa ii jiidanayo ayuu i yidhi "Samo, wax walba anaa sida ay yihiin kuugu sharxaya ee ha dhagaysan warkeeda". Ayadiina inta igu soo booday oo ay gacantii kale i qabsatay ayay tidhi "Maalin ma niyaysan in aan ku dhibo. Wax walba dhankiisa ayay ka yimaadeen i aamin marna xumaan kula jeclayn." intaan ku jaahwareeray sidii aan marba mid dhankiisa u jalleecayay ayaan halmar ku qayliyay "MAXAA DHACAY İ FAHANSİİYA FADLAN HA İ WAALİNİNEE?". İsagii ayaa isku dayay in uu hadal igu qanciyo isaga oo isku dayay in uu dhankeeda iga fogeeyo. Markaas baan inta ayadii ku jeensaday cod xanaaq faro badani ka muuqdo ku idhi " እዚህ ምን እየተከናወነ ነው" oo aan ka waday maxaa meeshaan ka dhacaya. Marka aan fahmi waayay warkoodii iyo sida ay iskugu kay dhiidhiibayaan aniguna aan u adkaysan waayay qabowga meesha ka jira ayaan aniga oo hadal oran u jihaystay in aan gurigayga iskaga laabto.

Marka aan sidaas cagta u saaray xakabadii albaabka ayaan maqlay Amleset oo leh "አሁን እርጉዝ ነኝ" Wadnaha ayaa i istaagi gaaray, dhulkii ayaa ila wareegay. Aniga oo arkaya ayay indhihii i madoobaadeen. Qabowgii jawiga waxaa ka qaboobaaday gacmahaygii, meel la iga jiro ayaan garan waayay. Sidee ayay macquul ku noqon kartaa arrintaasi? ma in ay sidaas foosha xun u jabiyaan qalbigayga ayay xilligaan iigu yimaadeen. Waxyar oo naxariis ahi xataa masoo galin miyaa qalbigeeda sidee ayaa ay ula seexan kartaa saaxiibteed ninka guursan raba, walibana ay inta ugu timaado gurigeeda ugu sheegi kartaa in ay uurkiisa leedahay?!.

********

Aniga oo aan dhankiisiiba eegin ayadiina hadal u celin ayaan orod gurigaygii kusoo galay. Waa ay iga daba-qaylinayeen labadooduba. İnkasta oo ay i tidhi kaliya uur baan leeyahay haddana jawiga meesha ka jiray ayaa caddaynayay in ay ka wado isaga ayaa aan u leeyahay. İsagiise ma aanan siin fursad uu igu sheego sheekada dhankiisa. Ma aqaan sida aan kusoo fuulay jaranjaradii dheerayd ma wiishka ayaan soo raacay mise jaranjarada kala garan maayee sariirtaydii ayaan isku soo tuuray aniga oo halgaad ah. Maskaxdii isla ilbiriqsigiiba waxa ay dib ii dhex gaysay subixii aan isku baranaynay wajahada hore ee huteel istanbul Plaza!. Qaddartu miyay ogayd in aan jigjiga dhexdeeda iskaga baranayno huteel sida magaca magaalada aan ku qaadanayno nolosheenna inta ugu xiisaha badnayd sidoo kalana ugu xanuunka badnayd? midaas ma waxa aan dhihi karaa kadis mise waa shirqool qaddartu noo qarisay. Waxa aan aniga oo jeego jeego u jiifa indhahayga illinta ka qulqulaysaa ay dhulka ku tifqayso aan dib u milicsanayay sidii uu bilowgii ugu ekaa mid dhowrsoon iyo sida uu aakhirkii usoo baxay mid u eg shaydaan, shaydaan mise shaydaankaba isaga ayaa tababaraya!.

Aniga oo marxaladii ku sugan ayaa taleefankaygii soo sanqaray waxa aan eegay cidda farriinta iisoo dirtay, waa hooyaday oo ileh "barri 9;00 fiidnimo dhankiinna ayaan kasoo dagayaa Atatürk international Airport ee sidaas la soco hooyo macaan. (Amxaari ayaan ku wada hadalnaa labadeennu si aysan u adkaan turjumidu ayaan luuqadayda idiin ku adeegsanayaa). Marka aan sidaas u arkay farriintii hooyo ayaa waxaa igu soo dhacday fikrad shaydaanimo ah, fikrad danbi iyo dhiig qulqulaya ah. Fikrad i dareensiisay in aan u malabsanayo cabista dhiigooda.

Aniga oo eegaya taleefankii walina indhaha ku haya farriintii hooyo ayaa uu isoo wacay. Dhiirranaa yaa dhalay! miyaanan ahayn naagtii hadda waji gabaxii la ogayd hortiisa uga soo carartay. igama uusan soo daba ordin iskumana uusan dayin in uu i raali galiyo ee markii aan soo dhaqaaqayay isha ayaa uu iga daawanayay isaga oo afka oo kali ah ka leh. "Gacaliso isdaji!."

Hareerahayga ayaan eegay mise kaligay baan ahay cidina igama ag-dhawa qofna igu wiirsan mayo oo ma oga wixii aan daqiiqado lasoo kulmay. Markaas baan inta niyadayda dajiyay taleefankii ka qabtay. Hadal waxa uu iiga bilaabay. "Gacaliso Samo, waad ogtahay anigu adiga ayaa aan ku jeclahay, Saaxiibtaa wax walba oo na dhex-maray kadis ayaa ay ahaayeen. Anigu kuma talo-galin ayada ayaana qaaday tallaabada koowaad ee ma ahayn wax aniga dhankayga ka yimid. waxaan kuu ballan qaadayaa in aysan mardambe dhici doonin, haddii aad hadda i saamaxdo, waxa kale oo aan kuu sheegayaa in ay halmar oo kali ah dhacday arrintaasi, waanad garanaysaa naag baar ka jaasta in aysan sharaf lahayn, aqoonsanna karin ninka ay uurka u leedahay aniga ayaa ay rabtaa in ay i sumcad disho aniga iyo adigana na kala disho. waad ogtahay xabashidu in ay xaasidiin yihiin wax la aaminana aysan mudnayn." Waan u aamusay oo hadalkiisa oo kali ah ayaan dhagaysanayay ayada oo aysan afkayga juuq kasoo bixin.

Hadalkiisii ayuu sii watay, "Samo, xabashidu waa xaasidiin marka aan leeyahay kama wado xabashida oo dhan waayo adigaba dhiig xabashiyeed ayaa kugu jira." Hadda miyuu xasuustay xabashi-nimadayda! Alla ninku garaad yaraa anigu maxaan la ahay tolow ma wax cawaan ah oo waxa uu doono uu ka dhaadhicin karo. "Gacaliso, Si'aad ii aaminto una dareento in aan sidaydii kuu ahay, waxaasina ahayd khalad halmar oo kali ah dhacay, Guurkeenna waa aan soo hormarinayaa waxa aan ka dhiganaynaa bisha soo socota sidee u aragtaa? Wali sidii ayaan u aamusananay oo isagii oo isku dhex yaacsan ayaa burqanaya hadbana mowjad ku booday, haddana waxa uu yidhi "Samo, amleset uurka waa ay iska soo xaaqaysaa waxba haka baqin mardambe aniga ima ay daba imaanayso, dhexdeenana soo ay gali mayso ee i aamin iguna kalsoonow jannadaydiyeey." Waxa aan uga naxsaday hadal uusan iga filan waxa aana idhi " Hooyo ayaa habeen dambe fiidkii imaanaysa, si'aan garoonka diyaaradaha uga soo qaadno, soo diyaargarow oo 8:00 fiidnimo iigu imow albaabka guriga." İsaga oo aad moodid in uu afsoomaaligiiba ka dhumay ayaa uu yidhi "Maxaa tidhi hooyo aaa! maxaa ay u imaanaysaa? maxaadan horay iigu sheegin?" "Fasax miyaan ku waydiisan lahayn?" ayaan waydiiyay. İntuu calyadiisii dib u liqay ayuu yidhi "Haye gacaliso, wax walba oo aad tiraahdid waan fulinayaa ee hadda miyaad i cafisay?" cod qabow faro badan laga dheehanayo ayaan ku idhi "Hooyo yay kaa dareemin in dhexdeenna wax khalad ahi jiraan." taleefankiina waan ku damiyay.

****

8:00 fiidnimo ayaan kasoo dagay jaranjaradii gurigayga, isaga oo albaabka igu sugaya. Qabow faro badan ayaa jirayw waxa aan soo qaatay jaakad madow oo lowyaha joogta iyo kabo dhaadheer oo illaa bowdyaha soo gaaraya. Jaakada waxa aan ka hoos qabay garan suuf ah oo ayaduna madow. timaha galabtii ayaan koofeer ii dhawaa tagay oo aan uga soo dabtay sida xabashida, waxa aan rabay in aan hooyaday uga farxiyo in dhaqankeedii iga muuqdo, si kasta oo aan ugu soo koray bulsho ka fog bulshadeedana aan ahay, gabadheedii dhaqankayguna yahay dhaqankeeda. Agtiisa marka aan soo istaagay ayuu i yidhi "Maxaad sidaan adiga oo dhan iskugu soo madoobaysay". intaan u dhoola-cadeeyay dhoola-cadayn shaydaanimo ka muuqato ayaan idhi "Si'aan looga arkin dhiiga dadka aan layn doono!." si layaab leh ayaa uu ii eegay.

Taksi uu sii ballamiyay ayaa iridda taagnaaye horay ayaa aan u galay. İllaa iyo inta aan ayraboorka ka tagaynay waa uu ila hadlayay, hadba hadal daan-daansi ah ayaa uu igu soo tuuray, aniguse hal kelmad uma furin. Waxa aan arkayay isaga oo fadhigu dhibayo, hadba taleefankiisa eegaya sidii in cid uu ka walwalayaayi farriimo ku waalayso. Ama uu sugi la'yahay arrin uu ka dhursugayo. Waxa ay tahayba anigu waxa aan ku tiirsanaa dhanka daaqadda waxa aana daawanayay wadada iyo quruxdeeda, layrarka iyo iftiinkooda. tiro dhawr jeer ah ayay indhahaygu qabteen muuqaalka lammaane gacmaha is haysta kuwa is dhunkanaya iyo kuwa laabta isku hayaba. Halkani waa İstanbul oo muuqaalada noocaas ahi waa ka dabiici, waxa aad is oranaysaa magaaladaan dadkeeda oo dhami waa mucaashaqiin, kuwa waliba isku daacad ah, maaha sida aniga iyo saaxiibkay oo kale!. Xalay inta is khiyaannay haddana gacmaha ishaysanna. Aniga oo sidii u daawanaya daaqadda ayaa waxa ay halmar indhahaygu qabteen gabadh yar oo wadada dhinaceeda ku tumanaysa muusig! dadku afarta dhinac ayaa ay u dhaafayaan cidna eegi mayso oo qof walba jawiga qabow iyo tiisa oo cuslaysay ayaa ka badan. Cidna uma muuqan in ay dhagaysanayso. Ninkii taksiga ayaan halmar ku idhi ii istaaji gaariga. Gabadhii yarayd ayaan agteeda tagay, tiro dhowr daqiiqo ah baan si khushuuc ah u daawaday sida dabacsan ee ay u tumayso aaladda yar ee ay gacanta ku wadato ee aan magaceeda garan waayay. İntaan dhabanka ka dhunkaday ayaan 20lira ugu riday daasad yar oo horteeda taallay. tabeebe madow oo aan qabowga ka watay oo surka iigu duubnaana waan huwiyay. Markii aan is idhi ka dhaqaaq ayay darafka qabsatay jaakadaydii markaas baan soo eegay, aan usoo jeensadayba laabta ayaa ay i gashatay, laabtayda ma ay gaarine waxa ay isku martay lugahaygii. İllin baa isoo dhaaftay wax aan ku iraahdo ayaa aan garan waayay. Suuryaanad ayaa ay ahayd ku hadlaysa turki jajab ahe, waxa ay igu tidhi waddankee ayaad tahay si'aan u ogaado qofkaas naxariista badan waddankiisa niyadana aan uga jeclaado marwalba. İntaan dhabanka ka dhunkaday ayaa aan ku idhi. itoobiyaanad ayaa aan ahay noloshu indho madow ku eegtaye Nabad ahow.

Gaarigii marka aan soo galay ayuu i yidhi saaxiibkay, "Maxaa kugu dhacay, naxariis noocaas oo kale ah intii aan ku aqaannay kuguma aqoone, bal iskaba daaye waxa aad ahayd nooca ciyaalka tuugsanaya marka ay soo agmaraan cayriya, ama indhaha xun ku eega! maxay tahay naxariista caawa meesha aan la aqoon kaaga soo degtay." intaan sidii hore oo kale ugu dhoolacadeeyay dhoolacadayntaydii heerka shariirnimadayda laga dheehanayay ayaan idhi "Waxa aan dareemayaa in aan u baahanahy in la iigu naxariisto waxyaabahaas yaryar waayo waxa aan ogahay in aan gali doono dambiyo aan la cafin karin!." waji baqdin leh isaga oo igu eegaya ayaan tagnay albaabka hore ee ayraboorka. Gudaha haddii aan galnayba annaga oo aan wax saas ah sugayn ayay hooyo timid. Dhererkeeda, muuqaalkeeda, iyo labiskeedaba marka aan arkay waan ku xamdiyay inay hooyaday tahay. Aniga oo dareemaya in aan dib ula midoobayo ruuxdaydii luntay ayaan in muddo ah laabta ku haystay. Kadib ayaa ay saaxiibkay salaantay isna si qurux badan usoo dhaweeyay.

Aniga oo meel dhinac ah taagan bartamaha ayraboorka ayaa ay hooyo gees nooga dhaqaaqday, boorsooyinkeedii ayaa kasoo habsaamay isaguna wuu daba galay si uu u caawiyo. İnta ay is garab socdeen waxa aan maskaxdayda ka dhex daawanayay habka aan u fulin doono fikradda habeen hore igu soo dhacday ee bahalnimada ah

bushunta ayaan macaansi qaniinayay aniga oo dareemaya sidii in aanba sameeyay oo aan fuliyay qorshihii. wax walba waxa ay madaxayga dhexdiisa uga muuqdeen sidii in ay u dhici doonaan si aan khalad lahayn, lagana shakiyi doonin.

MASAYRKİİ DİLAAGA AHAA Q: 5AAD.

Annaga oo gacmaha is haysanna mararka qaarna si qarsoodi ah isu dhunkanayna si'aan u dareensiino hooyo heerka jacaylkeenu joogo ayuu taksigii soo istaagay afaafka hore ee dhismihii aan deganaa. İsaga ayaa naga hordagtay oo boorsooyinkii hooyo soo dajiyay aniguna hooyo ayaan daaqada ka furay madama aan anigu xigay. Gurigii ayaan ku galnay qosol iyo farxad wax walba waxa ay u muuqdeen kuwa dhamaystiran. Hooyo durbadiiba musqusha ayay qubays ugu gashay. Anigii iyo isagii ayaa isku soo harnay!.

Wajigiisa waxaa ka muuqda deganaansho la'aan. Wuu hubay in aan siriq u dhigayo. 3sano iyo dheeraad ayaanu ahayn labo aan daqiiqad is moogaan, sidee ayaa ay caqli gal ku tahay in aan isaga oo dambiga la arkay galay aan sidaas fudud ku cafiyo. Alaabtii hooyo ayaa aan qolkaygii u geeyay marka aan sidaas qolkii u galayba waa kan isagii oo iga daba yimid.

Afka ayuu afka ii saaray aniga oo aan iska jirin waxa uuna i dhunkaday shumis u eg keenii koowaad gacmaha ayaan ku qabtay darbi gadaashayda ahaa aniga oo ku tiirsaday. waan neeftuurayay sidii in aan samaynayo wax aan munaasib ahayn. Neeftuurkaygaas iyo shumiskaas filasho la'aanta ah waxa uu halmar i dhex dhigay marxalad horay iisoo dhaaftay. Waa kan anigii oo 13jir ah, dhex taagan qol ku yaalla mid kamid guryaha duuga ah ee xaafada haamaha.  Waa uu iga dheera aniguna aad ayaa aan u muuqaal yaraa waqtigaas, aniga oo kasoo baxaya qolkii eedaday ay deganayd ayaa uu si kadis ah albaabka uga soo galay soo galitaankiisii ayaa aan inta isku naxay gadaal ugu noqday gurigii. Nasiib darriyaa bal maan horay usoo boodo maxaa gadaal iigu celiyay rugta baas. İnta uu hooskiisii igu qariyay ayuu aniga oo darbiga ku naban isku soo ka naban sida aan hadda gacmaha darbiga ugu cuskaday ayaan markaasna ugu cuskuday. Marwalba ma waxa aan ahay mid baqanaysa oo dareemaysa daciifnimo iyo handadaad?

Ugu yaraan waa markii ugu dambaysay oo aan sidaas dareemi doono waayo waan hubaa oo marka aan fuliyo fikradaan madaxayga daalinaysa waxa aan ka nasan doonaa xasuuso badan oo xanuun leh!. Waxa aana noqonayaa mid aarsatay kana takhalustay kuwii xanuunka u sababayay? miyaadan adiguba samayseen sidaas haddii aad booskayga taagnaan lahayd? waan hubaa oo haa ayaad tidhi adiga oo aan wali ogaan waxa aan samayn doono taasi waxa ay caddayn u tahay in adigaba ay kugu jirto ruux u oomman in ay dhiig-daadiso oo ay ku mayrato dheecaanka kuwa xanuunka u sababay.

Aniga oo jiidaya neeftiisii isaguna uu afka afka iigu hayo oo uu jaqayo bushintayda hoose ayaa ay hooyo xim xim ka tidhi albaabka agtiisa!. Dhakhso badanaa goormee ayaa ay qubayskii soo dhamaysatay mise annaga ayaa muddo meesha taagnayn garan maayo midka ay tahaye casho aan galabkii diyaariyay ayaa aan oven ka galiyay oo aan ku kululaynayay intii aan cashadii kululaynayay ayaa ay isaga iyo hooyana fadhiga fariisteen. Hooyo waa markii koowaad oo ay si shakhsi ah u aragto saaxiibkay tiro dhowr jeer ah ayaa ayse ku wada hadleen video call. Hooyo ayaa si kaftan ah ugu tidhi " Si wanaagsan ayaa aad amxaariga ugu hadli taqaanaa sidee ayaad sidaas wanaagsan ugu baratay." isagana isaga oo qoslaya ayaa uu ku yidhi "Waxa aad moodaa in aan ogaa in aan Samo hooyadeed kula sheekaysan doono sidaa daraadeedna aan u bartay." labadoodiiba waa ay qosleen intii ay qoslayeen cashaduna kululaanaysay ayaan is idhi "Qolka dib ugu laabo oo wax aan uga baahday soo qaado."

Marka aan qolkii galay ee aan dantaydii soo dhamaystay ayaa aniga oo soo bixi raba waxa aan arkay boorsadii gacanta hooyo oo furan! Maxaa igu watay in aan ku hakado oo aan eego haddii aan ogaan lahaa in aan ogaan doono wajiyada u qarsan hooyaday kuma deg-degeen. Waxa aan isha ku dhuftay baasaboorkii hooyo Barbara Clarke indhaha ayaan taagay. Waa ayo islaanta aan guriga kusoo xaraystay aniga oo hooyaday Mazaa yohannes ayaa la dhahay. Baasaboorkii haddii aan eegay maaha American ah ee waa Barbados Passport halka ay ka timid maaha Los angeles ee waa Havana Cuba. Qarracan ayaa dhulku ila gariiray aniga oo shaki wayn i galay sidii qof waalanna u baaraya boorsadeedii gacanta ayay albaabka inta soo istaagtay i tidhi "Cashadii waa ay gubatay, la iskumana ogayn in la baaro alaab aan alaabtaada ahayn." Haddii aan soo eegayba waa ayadii oo albaabka ku tiirsan labada gacmood ku haysata caloosheeda ayaga oo isku saaran.

Aniga oo aad moodid in aan ahay shimbir qoyday mise tuug la qabtay ayaan aayar aniga oo aan juuq odhan uga soo baxay albaabkii. Cashadii ayaan cunnay aniga Saaxiibkay iyo Hooyaba. Anigu indhaha ayaan ka dadbayay hadba sidii in aan ahay anigu cidda dambiga gashay. Aniga hooyaday waxaa iigu dambaysay 14sano kahor kaliya taleefan ayaan kala hadli jiray dhawaan ayayna bilowday in aan muuqaal ku wada hadalno. Ma sheegi karo qofka i horfadhiyaa in uu hooyadaydii saxda ahaa yahay iyo in uu tuug yahay waxa kaliya ee arrintaas kala caddayn karaa waa in ay ayadu ii sheegto. Cashadii marka ay dhammaatay ayaan saaxiibkay macasalaameeyay laabta ayaan isgalinnay sidii in aan isku laab-fayownahay dunidu sidaas ayay been u wada tahay ogow wax walba oo aad arkaysaa xaqiiqo maaha anigu ninka aan qorshaynayo in aan dhiigiisa ku mayrto habeen saq dhexe isagu laabta ayuu i galinayaa isaga oo aan waxba ka ogayn waxa aan la damacsanahay.

Marka aan aniga iyo Barbara isku soo harnay ayaan inta jikada tagay oo aan soo qaatay mindi aan dhawr cisho kahor soo gatay kula soo dhaqaaqay ayada oo fadhiga fadhida. halka indhaheeda ku beegan inta aan ku beegay ayaan idhi yaad tahay maxaase gurigayga kusoo galiyay?!. İndhaha sida ay uga mirig-mirigsiinayso iyo xaddiga cabsida wajigeeda ka muuqatay ayaan in muddo ah ku raaxaysanayay daawashadeeda.

MASAYRKİİ DİLAAGA AHAA! Q: 6AAD.

Neef wayn ayay qaadatay, Mar waa ay jiidaysay naqaska marna dibada ayaa ay usoo saaraysay. Aniguna waan kor taagnaa oo waxa aan lahaa "İi sheeg sabab cad oo aan ku rumaysto in aad hooyaday tahay iyo in kale?". Gacanta ayay dhankayga usoo taagtay ayada oo i leh ''Aniga ayaa wax walba kuugu faah-faahinaya sida ugu macquulsan, aniga ayaa kuu qeexaya sida aan baasaboorkaan ku helay iyo wax walba oo aad jawaab u rabtide inaga dhig mindida wax lagu ciyaaro ma ahane.".

Aniga oo qaylinaya ayaan idhi ''Waxa aan ku moodayay hooyaday oo sax ah, sidee ayaad adiga oo dhan been uga samaysnaan kartaa?! magacaan Barbara waa maxay? wax i fahansii?.

Waan qaylinayay oo aan mindida hadba dhankeeda u taagayay ayaduna sidii shimbir qoyday ayay meel gees ah iskugu nabaysay. Halmar ayay indhaha inta galka ka bixisay cabsidii oo dhanna meel iska dhigtay horay iigu soo boodday aniga oo aan iska jirin. Dhulka ayaan iskula dhacnay mindidiina meel dhinac ah ayay ku faniintay. Ayada ayaa iga korraysay, culayskeeda oo dhan baan dareemayay waxa aan kor u eegay qaabka ay ayada oo dhami ii korsaarantahay, iilana dagaalamayso. inkastoo ay da'da afartameeyada ku jirto, haddana waxa ay la xoog ahayd gabadh labaataneeyada kasii baxaysa. Marka aan arkay sida ay ii maquuninayso halmar ayaa waxaa xasuustayda kusoo booday ninkii eedaday qabay ee xoogga waynaa!.

Waa salaada subax kadib, İslaantii eedaday ahaydi ma joogin. waxa aan ku baraarugay albaabkii alwaaxa ahaa ee gurigii carshaanta ahaa ee aan deganayn oo ruxmanaya waan dareemay in uu isagii yahay. Markaani ma ahan markiisii koowaad waxa aan isleeyahay waa markii 10aad. Albaabka kama aanan furin haddii aanan ka furin xataa taasi badbaado ii noqon mayn oo albaabka gurigu waxa uu ahaa mid duug ah hal laad oo uu ku dhufto ayaa ku filnayd in albaabku uu soo furmo isaguna gudaha soo galo. aniguna si'aanan uga xanaajin waxa aan qabatimay in marka aan garaaca albaabka maqlo ee aan yaqiinsado in uu isagii yahayba aan ka furo. Gabadh yar oo 13jir ah islaan xabashi ahi dhashay Aabeheedna waa hore duugoobay ayaan ahaa. Cidiba iskay waydiin mayn iskumana howlayn in aan fiicanahay iyo inkale noloshaas ayaa i bartay in aan illaa xadkaas baqo.

Sida ay ayadu iiga korrayso ayaa uu isaga oo igu haya faro aan arxan lahayn, meesha ay kaa taabtaanna aad moodaysid in ay ku go'ayso ayaa albaabka waxaa soo garaacday İslaantiisii yacni eedaday halmar ayaa uu iga booday isaga oo argagaxsan waxa uuna u cararay dhanka qolkiisa anna waxa uu i yiri "2daqiiqo kadib fur albaabka amxaaro yahay, amxaaradu dhashay."

Haddana albaabka ayaa lasoo garaacay waan isku naxnay waa ay iga booday ayada oo leh " İ dhagayso wax-walba aniga ayaa si degan kuugu sheegaya haddii aad si deganaansho leh u dhaqanto Hooyo." Kelmadaasi marka ay afkeeda kasoo baxday ayaan qaboobay aniga oo dhan. goormee ayaa iigu dambaysay in aan maqlo in Hooyo cidi i tiraahdo? mise waxaaba iigu horraysay dhawaan markii aniga iyo ayada xiriirkeennu soo cusboonaaday.

Albaabkii la garaacayay dhankiisii ayaan u dhaqaaqay, haddii aan furayba waa Amleset maxay iga doonaysaa oo saacadaan keenay albaabkayga! Aniga oo yaabban indho xun oo xanaaq lehna ku eegaya ayay i tidhi " እባክህን ላናግርህ" oo ay ka wadday fadlan ii ogoloow in aan kula hadlo. Hooyaday mise İslaantii guriga iigu jirtay ee aan daqiiqad kahor ia haysannay marka ay maqashay in qofka albaabka taagan uu gabadh yahay walibana ay amxaari ku hadlayso ayay inta soo dhaqaaqday ayada oo aan aniga iga idansan. Salaantay oo ay magaceeda waydiisay una sheegtay in ay hooyaday tahay. Waali badanaa aniga ayaaba ka shakisan in ay hooyaday tahay iyo inkale e maxay ka wadaa aniga ayaa dhalay. Amleset marka ay ogaatay in ay hooyaday tahay, ayay isku oohisay, ku barooratay lugaha iskaga martay kuna beer jilicsatay in ay gabadheedii oo kale tahay madama ay xabashi isla yihiin. İsla daqiiqadaas aniga ayaaba dareemay in aan ajnabi ka ahay ayaguna iskaga kay dhaw yihiin.

Dhiiga wada dhalashadu waa cajiib, cajiibnimadiisana waxa aad dareemaysaa marka ay iska kaa dhalaan labo jinsiyadood oo kala duwan isnecebna sida xabashida iyo soomaalida. Anoo yaabban una fasixin in ay gurigayga soo gasho ayay gurigaygii gashay walibana kursigaygii ku fariisatay, ayada oo ninkii i aroosi lahaa uur u leh ayay gurigaygii dhex fadhidaa walibana koobkaygii wax ku cabbaysaa?!.

*********

Amleset hooyo ayaa ay u sheegtay sheeko aanan xaqiiqadeeda ogayn, ayadaa oo ku barooranaysa in uu khiyaamay ayada oo aan ku talo-galinna uu uur u yeelay. waxa naxdinta leh ee ay noo sheegtay ayaa ahaa in ay leedahay uur mataano ah, mataano labo kali ah ma ahane waa saddex ilmood!.

Wadnaha ayaa waran la iiga taagay, soo ayadii iska soo xaaqi lahayd ayaa halmar niyadayda soo gashay, nacasnimadayda ayaan la yaabay! oo miyaan rumaystay warkiisii oo xaqiiqo ahaan ayaanba u qaatay miyaa?!. Amleset ayada oo ooyaysa ayaa ay tidhi "Samo, waad ogtahay aniga baarkaas aan ka jaaso ayaan nolol-maalmeedkayga ka heli jiray, jaamacaddana ka dabari jiray. Hadda uur ayaan leeyahay hal ilmo ah ma ahane waa 3ilmood, wax aan sameeyo ma aqaani Aabahood waxa uu ii ballan qaaday in uu i guursanayo, Addis Ababa i gaynayo isaguna uu halkaan shaqada uu hayo kasii wadayo. Qorshe fiican ayuu ahaa waana ku raacay. Haddana waxa aan ka baqay in uu adigana kuu sheegay wax kale oo arrintaas ka duwan si uusan kuu khiyaamin ayaan kuugu imid si'aan xaqiiqada kuu ogaysiiyo. Adiguna madama aad kaligaa tahay aad iskaga quusato kana samirto jacaylkiisa madama uu hadda reer samaysanayo."

İndho adakaa sidee ayaa ay waxaas oo dhan ugu dhiiratay, halkee ayay ka keentay dhiiranaanta intaan tiro le'eg ee ay gurigayga ku dhex fadhido waxaasna wali iigu sheegayso, ayada oo dhankayga usoo jeeda iguna leh iskaga samir aniga ayaa carruurtiisa dhalayee ayaan halmar dareemay wax qoyan oo igu sayrmay haddii aan eegay waa Barbara oo mindidii markii iga dhacaysay dhuunta uga biraysay Amleset dhiigeediina uu aniga igu faniinay. Waan qeyliyay oo aan afka qeylo ku shubtay. intay igu soo booday ayada oo gacantii mindida ku haysata ayay afka i qabatay, oo ay dhanka suuliga ii jiidday..

Way isku dhex-yaacsanayd, waxa ay u muuqatay qof aan ku talo galin dilka amlaset anigii waan jaraynayay, wax aaan ku hadlo ma garanayn aniga oo u eg shimbir qafis lagu riday kaliyana shabaqa dhexdiisa ka daawanaysa waxa bannaanka ka dhacaya ayaa aan suuliga ku jiray.

Hortayda ayay taagnayd mindidii oo dhiigu ka tifqayana, hadba dhinac ayay la istaagaysay. Ayada oo madaxa gacmaha ku haysa una muuqata in ay xal goobayso. İnta aan ishayn waayay ayaan halmar idhi "Hooyo, miyaad waalantahay maxaa annaga oo ka baaqsan karna dilkeeda kugu kallifay in aad disho?." Darbiga suuliga ayay ku tiirsanayde halmar bay hoos dhulka u fariisatay ayada oo aan isdhaqaajin, darbiga ayay isku jiidday illaa salkeedu dhulka ka taabanayay. Hadalkeedii ayay ku bilowday.

"Habeen ayaa aniga oo shaqada ka imid, waxa aan soo galay gurigaygii aan isla deganayn aniga iyo ninkaygii jamaykaanka ahaa. Aniga oo aan qolka hurdada eegin ayaan inta boorsadii fadhiga dhigtay, si deg-deg ah suuliga ku galay, aniga oo dhexda maraya oo aan dhamaysan xaajadaydii ayaa waxa aan maqlay, qosolka qof dumar ah oo aan is idhi waa la kilakilaynayay. Aniga oo aan garanayn dhanka qosolku ka yeerayo ayaan usoo dhaqaaqay dhankii sanqadhu ka yeeraysay haddii aan xoogaa soo raacay waxa ay jabaqdii i keentay irridka qolkaygii hurdada. Aniga oo ku shakisan ma furtaa mise waad sugtaa ayaa si kadis ah waxaa albaabkii uga soo baxday gabadh african iyo caddaan inay iska dhaleen aan u malaynayo, way ordaysay oo ninkaygii ayaaba cayrsanaya malaha way fara-kaciyaarayeen!. Waan qallalay sidii in baraf aan ku qaboobay. Dhaq-dhaqaaq oo dhan ma aanan yeelan . Ninkaygii ayaa isaguna marka uu isha igu dhuftay ay ku noqotay filan waa'. Marka uu arkay in aan khal-khalay oo aanan wax falcelin ah bixinayn ayuu naagtii si hoose ugu yidhi maryahaaga xiro waan baxaynaaye. Ayaga oo deg-degaya ayay qolkii ku laabteen aniguna intaas waan daawanayaa wax falcelin ahna ma lihi. markay diyaargaroobeen oo ay albaabka kasii baxayaan ayaan soo miyirsaday qolkii ayaan horay u galay baskoolad uu ninkaygu lahaa oo koobadiinka ku jirtay ayaan soo dafay gabadhii oo xakabadda albaabka markaas cagta saartay ayaan shan xabadood dhabarka uga dhuftay."

Halkaas markay hadalka marinaysay ayaan lasoo booday "say ma dhimatay?" illin baa inta indhaheedii soo dhaaftay ayay hadalkii sii wadatay, "Ninkaygii baa dhankayga usoo orday, mooji ma waxa uu filayay in aanan xabadda ku dhufan doonin isaga. İsaga oo dhankayga gacmaha u

taagaya kuna qaylinaya "Don't do it babe, Don't do it" ayaan shafka 3xabadood uga dhuftay, malaha waan uga badin lahaaye rasaastii baskoolada ku jirtay baa dhamaatay.

Markii aan arkay in uu dhulka ku dhacay dhiigii gabadha iyo dhiigiisiina ay dhulka daadsan yihiin iskuna darsameen inta isku soo dareereen ayaa waxa aan fariistay kursigii aan boorsadayda saartay markii hore. cabbaar ayaan daawanayay sida ay meesha u yaalaan sidii ay daqiiqado kahor u qoslayeen iyo sida ay hadda dunida u macasalaameeyeen.

Guriga aan deganayn waxa uu ku yaaallay meel gees ah oo magaalada cabbaar u jirta. ninkaygu waxa uu ka shaqayn jiray shaqooyin sharciga aan waafaqsanayn sidaa darteed meel gooni ah ayaan deganayn si ay u fududaato in aan la ogaan qorshayaashiisa, cidda guriga timaadda iyo cidda ka baxda. Markii aan saacad fadhiyay ayaa waxaa igu soo dhacday fikrad aan anigu naftayda ku bad-baadiyo. Boorso ayaan maryahaygii ku gurtay waxa aan soo qaatay baasaboor fake ah oo uu ii sameeyay isagu bilo kahor. Cadow badan buu lahaa marka waxa uu ugu talo galay in haddii wax dhacaan aan isticmaalno annaga oo aan u baahnayn in aan sharciyadeenna saxdaa isticmaalno si'aan la inoo dabo galin."

İntii ay hadalka wadday oo dhan indhaha ayaan taagayay, İslaanta i dhashay illaa waaba islaan daroogada ka ganacsata, sidoo kalana dilaa ah layaab badanaa noloshu. Kadib maxaa dhacay ayaan waydiiyay markii ay sidaas hadalka iigu bilowday ayaan shanqar ka maqalnay dhanka fadhiga. Haddii aan usoo orodnay waaba amlaset oo nuux-nuuxsanaysa ma ay dhiman miyaa indhaha ayaan taagnay, oo in ay dhimatay ma waxaa nooga naxdin badan in ay nooshahay?!.

Caloosha ayay gacanta ku haysay cod daciif ah ayay nagu lahayd "İlmaha ii bad-baadiya!" Sidee ayaan ilmaha ugu bad-baadinnaa haddii aan damacno in aan dhakhtar gayno si dhiiga loo joojiyo waa nala ogaanayaa oo dambigeenna ayaa cadaanaya, haddii kalana waxa aan ku khasbannahay in aan sugno inta ay dhimanayso markaasna kama hawl yaroo waxaa khasab ah in aan maydkeeda qarinno. Annaga oo yaabban ayaa aniga waxaa igu soo dhacday fikrad, waxa aan u cararay dhanka qolkayga, waxa aan soo qaatay boorsadaydii gacanta baasaboorkaygii iyo ciqaamadii aan waddanka ku joogay. Hooyo ayaan ayadana u tilmaamay in ay alaabteeda aruursato. Miyaan cararaynaa ayay i waydiinaysay anna aniga oo aan u jawaabayn ayaan lahaa dhakhso. Guriga markii aan kasoo baxaynay ayaa waxa aan wacay jacaylkaygii waxa aan u sheegay in aan guriga ku sugayo ee uu deg-deg iigu yimaado. Albaabkii gurigaygana isaga oo riixan baan ka tagay.

Cabbaar ayaan soo lugaynay waxa aan nimid laamiga xaafadeenna ku yaallay halkaas ayaan ka wacay booliiska taleefanka darbiyada ku yaalla ee lacagta lagu waco. waxa aan u sheegay in xaalad deg-deg ahi jirto, waxa aana u tilmaamay in ay yimaadaan ciwaanka gurigayga. İntaas markii aan sameeyay ayaan si deg-deg ah taksi ku raacnay, waxa aan tagnay ayraboorka waxa aana qaadanayy tigidka diyaarad u baxaysay waddanka kibris oo 30daqiiqo kadib

duulaysay.

İntii aan diyaaradda sugaynay oo dhan  waxa aan eegaynay hareeraha annaga oo ka baqayna in booliisku na ogaadaan oo ay na qabtaan.

Markii ay soo fariisatay diyaaradayadu ee dadkii raaci lahaa ay u dareereen dhanka diyaaradda ayaan eegay telefishin meel darbi ah ku dhegnaa in gabadh itoobiyaan ah maydkeeda laga helay guri ku yaalla xaafadda taksim, loona qabtay wiil saaxiibkeed ah.

Diyaaradii ayaan fariisannay saacadda ayaan eegay mise waa 3:00am waabarigii ayaaba soo dhaw. Habeenku dheeraayaa. İnta aysan diyaaraddu kicin ayaan galay website ka tigidada laga goosto waxa aana helay tigidka diyaarad aadaysa Addis-Ababa oo baxaysa waqtiga aan annagu xagga ku aadannahay.

İnta aan eegay dhankeedii marka diyaaradii hawada gashay ayaan idhi, "Kadib maxaa dhacay?!".

MASAYRKİİ DİLAAGA AHAA Q: 8AAD

Aniga oo wadnuhu i gariirayo, niyadaydu i leedahay waa la idin ogaaday oo ayraboorka ayaa la idinku sugayaa ayaa ay diyaaradii cago dhigatay Nocosia İnternational airport oo ah ayraboorka caasimadda waddanka kibris. Saacad iyo bar ayaa ay diyaaradu soo socotay, wali waa habeen habeen oo waagu si wacan uma baryin. Annaga oo aad moodid in samada toosh na looga hayo ayaan gudaha u galnay. Waqti saas ah maba aanaan joogin ee horay ayaan kaga wareegnay diyaaraddii kale.

Waa galab aad u qurux badan cad-ceeddu waxa ay ka qabanaysaa wajigayga ka qabanaysaa dhanka galbeedka. Hadda cabsidii waa ay naga ba'day oo waxa aynu rajaynaynaa in aan dhakhsahaas nalagu ogaan doonin oo uusan warkeennu wali soo gaarin itoobiya. Marka aan taksigii raacnay ayaan iri madama aan dilaa nahay hal qof oo mudan in la dilo ayaa dhiman, qofkaas marka aan nolosha dhaafinno kadib nolosha aan dawaafno halka aynu jecelnahay, haddii nala qabto waynu mudannahay, haddii aan bad-baadnana kama dambi badnin siyaasiyiinta shacabka dhiigooda cuna walina ugu nool nolosha sida ugu quruxda badan.

Taksigii naga soo qaaday ayraboorka ayaa na geeyay huteel yar oo ah kuwa aan wax aqoonsi ah lagaa rabin. kaliya waxaa joogay nin aan is iri wuu cabsanaa iyo naagtiisa oo indhaha ka mirig mirig  siinaysay. waxa ay u muuqatay qof aad u cabsanaya nolosheedana khataro faro badan ku geedaaman yihiin, yeelkeede qol aan aad nadiif u ahayn ayay na siisay aniga iyo BarBarana sariirta ayaan isgarab jiifsannay si'aan bal daalka iskaga qaadno. 2saac ku dhawaad markii aan hurudnay ayaan maqalnay qeylada qof dumar ah. waan soo sasay anigu oo waxa aan moodayay in aan ku qarwayo Amlaset mase ahayne waxa yeerayaa waxa ay ahayd qeylo dhab ah. Berbera ayaa toostay oo si hoose iigu tiri ma ninkii baa naagtiisa dilaya baad isleedahay, waxa aan ku idhi "Wixii isdilaya ha isdileene seexo waxba noogama xirna e." İma ay dhagaysane waxa ay u dhaqaaqday dhanka albaabka marka aan arkay in aysan war iga maqlayn baan soo daba kacay.

Dhankii qeyladu ka yeeraysay waxa uu noqday qol aan wax saas ah ka fogayn kii ay naga kireeyeen. Albaabka ayay sidaas u furtay mise waa naagtii oo dhulka taalla maryo ma qabto oo waa ay qaawan tahay, malaha wuu xoogayay waxa aan moodaynay in ay isqabaan, macquulse waxaa ah in nimanku mararka qaarba ay xoogaan xaasaskooda ayaga kiiskooduse waxa uj yahay annaga oo aan ogaan ayaan ku qayliyay KA QAAD GACMAHAAGA.

Farihiisu ayada ayaa ay taabanayeen waxa ayse ila ahayd in aan anigu ku dhez jiro ruuxdeeda cidda lagu falaadayana aniga tahay. Afkiisii sigaarka iyo jaadku dilay ee urka qurmoonaa ayaa aan dareemay in uu ii urayo. Gacmihiisii qolofta ahaa iyo gacmaha uu kani islaanta ku hayaa waa isku qaab iyo isku muuqaal lama kala yaqaanno waa wasa cabtooy. Aniga oo aan garanayn goorta aan horay u galay qolka ayaa aan gacanta la helay dhalo wayn oo koobadiinka saarnayd ubax caag ah oo duug ahina dhex qotomay. Gacantayduba ima waydiin igamana ay amar qaadane halmar bay madaxa bashaaqisay. marka aan arkay isaga oo dhulka ku dhacay iyo naagtii oo qeylo afka shubatay ayaa aan soo baraarugay. waxa aan indhaha ku kala qaaday Hooyo oo naagtii afka haysa kuna leh "Adiga ayaa ku dhuftay dhalada, waana uu kugu xad gudbay ee xasuusnow sidaasna u sheeg askarta."

Orod ayaynu uga soo baxnay huteelkii yaraa waa fiid, dhulku wada qoyan yahay Addis oo xoogaa qabow ah, neecaw iyo roobna leh ayaan dhex lugaynaynaa annaga oo baxsad ah. Wadada dhinaceesa annaga oo marayna ayay inta i istaajisay hooyo, gacanteeda iiga qabatay garka madaxayga xoogaa kor u jeedisay ayay i tiri "İi sheeg maxaa kugu dhacay oo dareenkaaga beddalay halmar?!" İntaan dhaqaaqay ayaan fariistay jardiin yar oo qashin baco ah gees ka yaallay geeska kalana labo ey oo isbarkan ay jiifeen.

Waxa aan aniga oo hoos eegaya u bilaabay sheekadayda;

"Subixii koowaad ee arrintani dhacday waxa ay ahayd waqtiga salaadda subax masjidka laga baxo. Eeddo suuqa ayaa ay hilin ku gadi jirtay oo xilli hore ayaa ay bixi jirtay. Abti iga fur ayaa uu hadal iiga bilaabay, haddii aan ka furayna waxa uu bilaabay in uu i taataabto, taataabasho oo kali ah maaha." Markii aan halkaas marinayay ayaan inta xanaaqay ka kacay dhulkii aan fadhiyay, aniga oo aan hadal oranna aan iska dhaqaaqay. Hooyo waad dareemaysaa ogaatay in gabadheedii yarayd ay nolol xun ku noolayd. Miyay mudan tahay horta in aan sidaas dhaho, aniga aragtidayda Maya ayay ila tahay sababta oo ah haddii ay arrimahayga ka fakarayso ayada oo og in Aabahay dhintay, ayadu ay ajnabi ka tahay dadkii jahliga ahaa ee i dhalay warbixintaydana aysan ogaan karin miyay cidladaas iiga tagi lahayd?! Waan ka xumahay haddii aan xumaan ku dareensiiyay waxa aan la hadlayaa adigaan i akhrisanaya haddii labadaada waalid midkood uu kaa tagay oo aad qiil u raadinayso waxa aan ku dhihi lahaa waxba qiil ha u raadin, taasi waa wadada ay ayagu doorteene.

Dhanka astaanka gawaarida bas u socda ayaynu kornay, hadda ayada ayaan ka xanaaqsanahay in ka badan intii aan ka xanaaqsanaa odaygii eedaday qabay. Waan calool xumaaday niyadaydu waxa ay halmar i tustay waxa hooyanimadu tahay, waxaa qalbigayga kusoo dhacday sidii Amleset ayada oo naf-baxaysa ay caloosha gacanta ugu haysay, sidii ayada oo aan nafeeda ka fakarin ay u lahayd ilmaha ii badbaadiya!. Miyay noqon lahayd hooyo wanaagsan haddii ay noolaan lahayd? mise sida hooyaday oo kale ayaa ay nolosheeda raacan lahayd? Waxwalba oo igu dhacay dambigeeda anigu waxa aan u saaraa hooyaday sababta oo ah ayada ayaa ah qofka ilaahii u uumay uu gudaheeda igu khalqay, taasi waxa ay ka dhigan tahay in ay ayadu tahay meeshii ugu aaminsanayd ee laygu khalqi lahaa.

Bas jig-jiga u socda ayaynu fuulnay, daalka iyo gaajada nahaysa xisaab ma lahayn, kala aamus iyo isku cuqdadaysnaanna way noo dheerayd. Baskii oo kasii baxaya magaalada, layrarkii waawaynaa ee laamiga aniga oo indhaha la raacaya darbigana ku tiirsan ayay inta garabkayga ku tiirsatay i tidhi "Aabahaa markii aad dhalanaysay waxa uu filayay in wiil u dhalan doono. Meel walba waxa uu ku qoray magacii uu kuugu talo galay. Aniguna marwalba waxa aan ku oran jiray laga yaabaa in uusan wiil noqon ee sidaas oo dhan ha isku raacin. Markii aad dhalatay ee uu arkay in aad gabadh tahay aad ayuu u niyad jabay, labo bari wajigaaga ma uu eegin. Subixii dambe ayaan ku qanciyay in aan adigaba sidii wiilkii kaa dhigi karno maryihii iyo alaabtii uu kuusoo gaday ayaad ku ciyaaraysay oo aad isticmaalaysay illaa iyo intii aad sannad ka gaaraysay." Halkaas marka ay maraysay ayaan inta gacantaydii iskaga qabtay madaxeeda oo aan dhanka daaqadda u durkay si hoose u iri "Sababta uu u dhintay maxay ahayd?"

İllin baa soo dhaaftay ayada oo iska tiraysa ayay tidhi "Subax ayuu shaqada aaday. Duhurkii ayaa la ii sheegay in uu shil gaari ku dhintay illaa haddana ma ogi in ay dhab tahay iyo inkale." İntaan si layaab leh u eegay ayaan idhi "Maxaad uga jeedaa?" "Sababta oo ah aaskiisii kama qeyb galin, waxaa la igu yiri ilma adeeradiis ayaa isbitaalka meydkiisii kala baxay oo aastay. Aniguna wax dambe oo war ah kama helin. labo bari kadibna waxaa ii yimid Adeerkaa Abdi oo si khasab ah iiga soo kaa qaaday. Waxa uu iigu hanjabay in uu noloshayda baabi'inayo haddii aanan gabadhiisa siin. waxa uuna igu qalbi jilciyay in aan gabadh yar ahay, reerkaygu aysan igu qaadanayn dhoocil soomaali ah aniguna aanan noloshaada kafaale qaadi karin. sidaas ayaan kugu dhiibay ee marna raalli kama ahayn in aad daqiiqad beerkayga ka dhaxdo.

Shaki wayn baa i galay. Maskaxdaydu su'aalo badan bay i waydiisay waxa aan dareemay dareen ah in Aabahay nool yahay ee uu hooyaday ka dhuumanayay intaas oo sano. Haddana sidee ayaa ay macquul ku tahah illaa iyo intii aan 13sano ka gaarayay ayeeyo ayaa i korsatay, daqiiqadna ma arag isaga oo soo booqanaya haddii uu nool yahay soo ma ogaadeen?!.

MASAYRKİİ DİLAAGA AHAA Q:9AAD

Qeylo iyo isdagaal hadba qof eedayn ayuu habeenku nagu dhaafay, salaadda subax markii aadaankeedu yeeray ayaan soo galnay magaalada jigjiga. Markii aan gaarigii ka dagannay ayay inta dhankayga usoo jeensatay i tiri  "Muxuu yahay qorshaha aad jigjiga noo keentay?." Aniga oo isxanaajinaya ayaan iri"Awalba soo baxsad ma aynu ahayn miyaan lahayn qorshe gooni ah?".

Aniga maskaxdaydu way isku dhexyaacsanayd waxa aan xal u raadinayay bal in aan ogaado in aabahay nool yahay iyo inkale intii aan baska soo saarnayn dhawr jeer ayaan Berbara ku canaantay in ay ayadu khalad samaysay sidii la rabayna aysan u baarin ayaduse marwalba waxa ay i siinaysay cudurdaar isku mid ah ayada oo leh "dhalinyaro ayaan ahaa nin ajnabi ah ayaan guursaday cid i garabsiinaysa mahaysan haddana isaga in aan baadi goobo waxa ay agtayda ka ahayd wax aan sinaba ku suurtoobi karin."  Hooyo kaliya waxa aan u sheegay in aan jigjiga ugu soconno in aan soo dhamaystiro shaqo qabyo ah. adiguba waad fahmaysaa shaqada aan dhamaystirkeeda u imid, miyaysan sidaas ahayn?!.  haddase waan baddalay qorshaha oo waxaa lambarka koowaad ii ah in aan ka salgaaro Aabahay nolol iyo geeri midka uu ku sugan yahay.

Aniga oo raba in aan iraahdo Berbara huteel kirayso halkaasna ku jir inta aan kuu imaanayo ayaanba arkay huteel horteenna ah kii ayaan inta gacanta ugu taagay ku iri halkaas ayaan kuugu imaanayaa caawa ee ku jir inta aan maqanahayna ha samayn wax in la inaga shakiyo sababi kara. intay qososhay ayay tidhi dhulkeenii ayaan joognaa yaa inaga shakiyi kara, intaan indhaha ku gubay ayaan u sheegay in dhulkeenna laftigiisa marmar la inagu khiyaami karo oo ahaanshaha uu dhulkeenna yahay aysan ka dhignayn in aan wax la inagu dhex yeeli karin.

Suurayso xagee baan ku socdaa, waa jaaniskaygii ugu dambeeyay ee aan ku aarsan lahaa sidoo kale waa jaaniskaygii ugu horeeyay oo aan dilaa ku noqon kari lahaa. tuktuk ayaan soo raacay waxa aan kaga dagay albaabkii guriga. Waa isla sidiisii waxba iskama badalin albaabo duug ah oo alwaax ah. hortiisa waxaa dhooban digaag markaa moorada laga daayay. meesha oo dhan waa sidii aan kaga tagay sannado kahor. xoogaa ayaan noqday sidii qof waqtigu ku istaagay, waxa aan u muuqday sida saacad aan shaqaynayn. Xasuustaydu waxa ay dib ugu noq-noqonaysay maalintii adeer Sayid oo maraykanka kasoo guuray uu xaafadiisa ii wareejiyay. Gurigaan cidlada ah

habarta waayeelka ah iyo odaygeeda oo kali ahi ku nool yihiin muxuuu xusuus kharaar qalbigayga ku reebay. ugu dambayn albaabkii ayaan garaacay qiyaas yaa iga furay?.

İndho argagax ka muuqdo ayuu judhiiba igu eegay waxa aad moodaa in uu ogyahay sababta aan u imid, yeelkadeese waxa uu hadal iiga bilaabay Eedadaa xaaladeedu waa ay liidataa intaan waji amakaagay ku eegay ayaan lasoo booday maxaa helay? suu i yiri İn aad xanuunkeeda ogtahay oo aad sidaa daraadeed u timid ayaan mooday sidaa maaha miyaa?! Lama hadline qolkii aan ku ogaan jiray dhankiisa ayaan u dhaqaaqay. Albaabka ayaan si aayar ah u garaacay markaas bay cod jaraynaya igu tiri "Soo gal." Sariirteeda dhinaceeda ayaan fariistay markaas baan waydiiyay eeddo maxaa ku helay goormee ayaad xanuunsatay. Si dabacsan ayaan u waraystay waxa aana tusay naxariis aysan i tusin ayadu markii aan gurigeeda ku dhex silcayay ninkeeduna sida uu doono iga yeelayay. İndhaheeda marka aan arkay waxaa iiga muuqatay sidii in ay dunida macasalaamaynayso. rajo xumo ayaan dareemay, kama rajo xumaan in ay dhimanayso ee waxa aan ka rajo xumaa in aanan hadda fulin karin hawshii aan meesha u imid.

Gacantayda ayay soo qabatay aniga oo kasii kacaya sariirteeda markaas bay ayada oo hadalka shigshigaysa i tiri "Eeddo arrin ayaan rabaa in aan kuu sheego?." waan isku naxay maxay kuu sheegaysaa oo ay ogtahay habartaan sariirtii dhimashada saaran ayaan iswaydiiyay kadib baan inta gacanteedii gacantayda dul saaray ku iri "Eeddo ha isdhibin adiga ayaaba xanuunsan." kadib bay inta xoog ii qabsatay i tiri "Aabbahaa 2asbuuc kahor ayuu dhintay. ma yaabin oo awalba shaki baa igu jiray intaanse isu ekaysiiyay qof yaabay ayaan idhi "Aabbahay soo kii aniga oo sannad jir ah dhintay?!." ayada oo tabaryari faro badani hayso ayay isku dayaysay in ay i dajiso aniguna ismaba sii waaline waxa aan waydiiyay sida wax u jiraan.

Gacanta ayay iigu tilmaamtay in aan barkin dhabarka u galiyo, way soo yara fariisatay inta ay jambiga sariirta ku tiirsatay waxa ayna sheekadii iiga bilowday. "Waad ogtahay oo hooyadaa xabashiyad ayay ahayd taasi caqabad wayn bay ku ahayd xiriirkooda, dabadeed waxaa dhacday in khilaafyo badan soo kala dhex-galeen. marka aan leeyahay khilaafyo soo kala dhex galeen cudurdaar u samayn mayo wixii uu sameeyay ee kaliya waxa aan doonayaa in aan xaqiiqada ku dhex geeyo." halkaas marka ay maraysay ayaa waxaa qolka soo galay odaygeedii oo u wada caano markaas lasoo lisay koob inta uu ugu soo shubay ayuu u dhiibay. kadibna dibada ayuu nooga baxay, intii aan eegayay sida uu ugu adeegayo waxa aan ka baqayay in shaki iga galo qorshihii aan meesha u imid qalbigaygana naxariisi ku abuuranto.

Sheekadii ayay halkeedii kasii wadday ayada oo ku furfuranaysa halkee ayaan kuu marinayay. "Eeddo Aabahaa waxa uu qaatay go'aan khaldan intii uu ayada qabay ayuu waxa uu bartay gabadh ay ilmo adeer labaad yihiin oo maraykanka u socota addisna u joogtay in ay dacwad ka xaraysato. wixii uu sawirtay anigu ma ogiye intii aysan dhoofin ayuu mehersaday, markii ay xagga tagtayna waa isaga beenta ka sheegay dhimashadiisa sidaasna ku tagay. Ayeeyo ayaa adiga laguu keenay waan xasuustaa oo hooyo arrintaas raalli kama ahayn balse adeer cabdi ayaa ku qanciyay wax ay tahayba ayeeyo waa ayadii dhimatay adiga oo 8jir ah intaasna waxa ay ka walwalaysay sidii arrintaas laguugu sheegi lahaa." Ayada oo aan hadalkii dhamayn ayaan kasoo baxay qolkii ay ku jirtay. dibadda ayaan cabbaar soo lugaynayay miyaana diyaar u ahayn xaqiiqada waa maxay isbaddalkaan igu yimid soo anigii intii aan baska soo saarnaa oo dhan ka fakarayay macquulnimada in aabbahay nool yahay?!.

Saacad ku dhawaad haddii aan dhex lugaynayay luuqyada jigjiga ayada oo roob yari tiixayo dantu waxa ay i badday in aan dib ugu soo laabto islaantii sii dhimanaysay si aysan igagala dhiman xaqiiqada yar ee ay laabta ku haysato.

Waxa aan albaabka kasoo galay qolkii ayada oo faleembo lagu xirayo. xaaladeedii baa kasii dartay waxa ay u muuqataa in aysan waqti badan oo ay wax iigu kala dhig-dhigto uusan gacanteeda ku jirin. Ninkeedii ayay gacanta ugu tilmaantay in uu dibadda u yara baxo. halkii ayay sheekadii kasii wadday waxa ay i tiri "Aabbahaa waa uu dhoofay oo waxa uu tagay Magaalo wayn oo aanan hadda magaceedii xasuusan. naagtii 7ilmood bay u dhashay. carruurtiisii waaba waawayn yihiin oo wiilka curadka ahi waa 22jir." halkaas marka ay marinaysay ayaan lasoo booday Aabbahay ma adeer sayid baa?! intay hoos eegtay ayay iigu warcelisay "Waan ka xumahay waa isaga."

Qarracan waynaa adeer Sayid soo isaga iga kaxeeyay xaafadaan markii aan 16jirsaday maalinkii uu guriga eeddo albaabka kasoo istaagay waxa aan moodayay nasri ii yimid, wuuba ahaa Nasri ii yimid oo waa isaga jaamacad dalka dibadiisa iigu diray wax walbana ii qabanayay. Maalinkii aan geeridiisa maqlay 3bari ayaana waxba cunin sababta aan sidaan ugu murugooday waxa ay ahayd in aan agtiisa ka helayay jacayl iyo waalidnimo mase ogayn in uu isagu aniga waalidkay yahay. Haddii aan ogaan lahaa in uu i khiyaamay aniga oo noolna i dayriyay kamaba naxeen ee naarta ku waar ayaan aayar oran lahaa. wax aytahayba maskaxdayda tuhun baa galay adeer waa la dilay un baan maqlay ee ma ogayn cidda dishay iyo sababta loo dilay cid iiga sii sheekaysana ma helin. Eeddo ayaan is iri waydii bal waxa ay ka ogtahay cidda dishay haddii aan gacanteedii soo qabtay waaba mayd oo waa ay ruux baxday.

MASAYRKİİ DİLAAGA AHAA!. Q:10AAD

Cabbaar ayaan ruxruxay illin in aan iska keeno oo aan ka qiiroodo dhimashadeeda ayaan damcay si kasta ol aan yeelayse iima suurtogalin oo dhibic biyo ahi waa iga imaan wayday. Ninkeedii ayaan cabbaar daawaday, wuu khalkhalay oo qolka hadba dhan ka istaagay anigu indhaha ayaan ku hayay sida uu xanuunka u dareemayo, waxa aan isbarbardhigayay xanuunkii aan dareemay waaberigii koowaad ee uu khasabka igu jajuubay iyo xanuunka iyo cidlada uu hadda isagu dareemayo.

Dhawr daqiiqo markii uu isku dhex yaacsanaa ayuu soo miyirsaday, dareenyahay in aanan wax xanuun ah ka qabin dhimashada Eedaday laxawna aysan igu hayn. "Maxaad lasoo indho caddahay, orod deriska u qeylo gee." ayuu cod adag igu yiri. İnta aan kacay oo dhankiisa usoo dhaqaaqay ayaan inta shafka ku dhegay iri "Ma dhimashadaada ayaan uga qeylo geeyaa, mise ayada teeda?" İnta uu isku dayay in uu iska kay fujiyo ayuu isaga oo i kala tuuraya yiri "Xanuun nafsi ah ayaad qabtaa, qof caafimaad qabta ayaan ku moodayaye, yaynu ku kor dagaalin meydka korkiisa." ayuu isaga oo illini ka tifqayso ishiisa bidix si catow ah u yiri.

+++++

İsaga oo albaabka kasii baxaya ayaan gadaal kaga imid, mindi aan jidka kasoo gatay intii aan socodka usoo baxay ayaan kelida midig ku beegeeda kaga taagay. Aaah!! ayuu si cod dheer u yiri, dhiig kasoo faniinay ayaa gondaha iiga daatay. Waan is dhaafiyay se iima suurto galin. Waxaa qalbigayga haraysay illaa into aan ahay qof liidata oo eedadeed meydkeeda ku kor dilaysa ninkeedii. Cabbaar buu galgashay, waxa uu isku dayay in uu dibada u baxo madama uu albaabka u dhawaa, rafaad dheer kadib waan ku guulaystay in aan dhanka qolka u jiido. daaradii guriga oo dhan waxaa hareeyay dhiig, cidina ima ogayn aan ka ahayn in aan marmar ka shakinayay in eedadayda meydka ahi ay wali nooshahay. Markii aan hubsaday in uu neeftiisii ugu dambaysay dunida ka qaatay ayaan inta wajiga calyo kaga tufay, kasoo dhaqaaqay. Albaabka markii aan kasii baxayay ayaan maryahayga eegay mise dhiig tif tif ah baa dacal walba kaga yaalla. Qolkii baan gadaal ugu laabtay labadii maro ee aan qabay inta aan siibay ayaan dirac iyo garbasaar wayn oo Eeddo lahayd soo gashaday. Albaabka qolkeedii marka aan soo dhaafay ayaaa wax lugta i

qabsadeen, korbaan inta u booday waji waji dhulka ugu dhacay. İsagii baan wali dhiman xarbigii uu nafta la xarbinayay ayuu lugtayda oo sii tallaabaysa gacanta la helay. İsaga oo igu dhegan ayay naftu ka baxday taas oo adkaysay in aan iska fujiyo gacantiisii, muddo aan yarayn baan meyd la lagdamayay ugu dambayn aniga oo xuurtoonaya ayaan rugtii jinni kasoo baxay aniga oo hubinaya in aysan cidina i arag.

****

Waxa ay ku dhawdahay makhribkii, waxa aan ogahay in Hooyo mise Berbara ma aqaan mid aan ugu yeedhee ay Huteelkii igu sugayso, wax aan ula tagana aanan aqoon. İntii aan jidka sii socday kuna wajahnaa huteelkii aan kaga imid waxa ay niyadaydu i waydiinaysay in ay ayadu ogtahay in uu Aabahay Sayid ahaa iyo inkale. Sababta oo ah dhawr jeer aayan uga sheekeeyay sidoo kale way ogayd in uu isagu ii qorsheeyay iina diray jaamacadda waxaas oo dhan ayada oo la socotay sidee ayay macquul ku tahay in aysan ka warqabin in uu Sayid Aabbahay yahay? markale ayaan iswaydiiyay ammayba ayadu tahay cidda dishay ee la sheegayo?!.

Huteelkii ayaan irridka ka galay wiil yar oo caato ah ayaa qeybta soo dhawaynta joogay, "Yaad u socotay ayuu igu kadiyay?" Berbara ayaan cod degan ku iri . intuu dhawr warqadood rogay ayuu igu yiri qolka 17aad ugu tag.

Albaabkii ayaan ku gargaraacay, markii ay isha igu dhufatay ayay isku naxday . Waxa aan ka tagay aniga oo qaba surweel jeemis ah miskahana igaga dhegan iyo garan xudunta korkeeda joogta. jaakadii markii aan jigjiga soo galay ayaan ayada uga tagay. Haddana waxa ay i aragtay aniga oo sidii habar soomaaliyeed ku labbisan garbasaar wayn oo shan yaardi ah, googarad iyo diric ayaguna kasii dheer. Aniga oo aan la hadal ayaan isku tuuray sariir qolka dhex bartankiisa taallay. Haddii aan cabbaar sariirtii kor aallay waxaan dareemay in wax khaldan yihiin waxa ay i tustay markay cabbaar iga aamusnayd sawirkaygii oo internetka wareegaya waa war kasoo baxay dalka turkiga kaas oo dawladda itoobiya lagu soo gaarsiiyay in aan Addis-Ababa ku suganahay İstanbulna gabar kale oo itoobiyaan ah qudha kaga jaray. Anigu aad ugama nixin warka oo waan ogaa in marka ay noqotaba mar nala ogaanayo ayaduse waxa ay u muuqatay qof si xad dhaaf ah u baqaya. Waxa aan waydiiyay sababta ay sidaas ula qarracansantahay marka aan jawaab waafi ah ka heli waayay ayaan ugu qalbi qaboojiyay in aysan ayada cidina ogayn, raadinaynna qof og in ay ayadu Amlaset dishayna uusan jirin.

Aniga Amlaset dilkeeda in aniga la ii haysto waxaa iiga darnaa labadii qof ee ayaga oo is agyaalla meydkooda aan kasoo tillaabsaday. waxa aan iswaydiinayay tolow mala ogaan doonaa mise marka ay maalmo yaallaan ee ay dariska usoo uraan baa la garan doonaa!. waxaas oo dhami waxa ay ahaayeen wax aniga xanuun gooni ah igu haya. Markii aan dilayay waxa aan islahaa xanuunkii uu yaraantii ku baday oo dhan ayaad kaga bogsanaysaa marka aad dhiigiisa ku fool dhaqato mase suurtogalin oo walwal iyo xanuun ayaanba ka qaaday. Waxaa kale oo maankayga ka bixi wayday hadalkiisii ahaa waad xanuunsanaysaa, dhabtii miyaan xanuunsanayaa?!.

Casho ayaan u dirsannay wiilkii caatada ahaa ee meesha joogay. Cashadii annaga oo cunayna ayaan waydiiyay Berbara in ay ogayd in Sayid Aabahay yahay iyo İnkale?!. Awoodeeda oo dhan way isticmaashay si ay isaga dhigto in aysan waxba kala socon umase suurtogalin oo durbadiiba waan dareemay in ay been sheegayso marka aan kaashaday khibradda yar ee aan u leeyahay luuqadda jidhka ee qofka iyo habka uu u falceliyo. Markii aan huteelka imid ee ay ii sheegtay in warkaygu internetka yaallo ayaa waxaa igu soo dhacday fikrad ah in aan Sayid dilkiisiina ka baaro internetka waxa warbaahintu ka qortay, waxa aan arkayse waxa ay ahayd lama filaan. Warbaahinta mareykanku waxa ay meel walba dhigtay sawirkeeda oo ah sidii ay awal u ekayd, timo madow iyo muuqaal xabashiyeed ayada oo leh. Haddase saa uma ay eka oo waxa ay leedahay timo cad, waji ka cad kan xabashida iyo makeup u ekaysiinaya qof latin ah mise african american ah ma kala sixi karo. Su'aasha iskama waydiin ee waxa aan waydiiyay aniga oo og in sababta ay baasaboorka u baddalatay aysan ahayn dilitaanka nin jamaykaan ah ee ay tahay dilitaanka Aabbahay.

Waxaan daawaday waraysi dheer oo lala yeeshay naagtiisii carruurta u dhashay ayada oo ka warbixinaysa sidii ay naagtaan looga shakisan yahay dilkeeda isku barteen. Kadib ayaa la ogaaday in uu naag xabashi ah mar guursaday kana soo dhuuntay taas oo shakiga soo galisay Berbara oo ayaduna sidaa ku fakatay.

Aniga oo afka sii gashanaya cad hilib ah oo la socday canjeelo daafida la inoo keenay ayaan iri "Waan ogahay, in aad adigu dishay, waxbase iigama xirna dilkiisa ee waxba ha iga cabsan hana moodin in aan ka xumahay." İndho layaab leh ayay igu eegtay markaas ayay i tidhi "Maxaadan uga xumayn?." "Sababta oo ah waxba iigama xirna, haddiii isaguba Aabbenimo ii aqoonsan waayay aniga maxaa iga galay aqoonsiga cidda dishay isaga?!". İntay qososhay ayay tiri aniga oo kale ayaad tahay. İntaan aniguna canjeelo afka ka buuxsaday ayaan iri "waxaa laga yaabaa daqiiqado kadib, hadalkaas in aadan waafaqin." İn aysan i fahmin ayay u ekayd. Dhawr daqiiqo

markii laga joogay cuntadii aan cunnay ayaan iri "Hooyo, caloosha ayaa i xanuunaysa cabitaan aysiid leh baan banaanka ka doonan waana kuu soo laaban daqiiqado gudahood ee isii sug." Haye ayay indho jacayl ka muuqdo igu tiri.

Dibadda markii aan uga soo baxay huteelkii ayaan waydiiyay wiilkii yaraa ninka huteelka iska leh in uu joogo iyo inkale, waxa uu ii sheegay in uu xaafadiisii u hurdo tagay. Waxa aan u sheegay in fursad muhiim ahi dhaafayso haddiise uu rabo in uu ka faa'iidaysto ay tahay in shan daqiiqo gudaheed ku yimaado. İndho layaab leh ayuu inta igu fiiriyay isaga oo isha la raacaya dharkayga waawayn ee duugga ah ayuu is waydiiyay fursadda aan u hayn karo imase uu beenaysane maamulihiisii ayuu wacay. 10 daqiiqo oo aan kursi ugu fadhiyay ayaa ila dheeraatay, kadib ayaan inta istaagay si kibir leh i iri fursadii kama aydaan faa'iidaysane naba..... Anoon hadalkiiba dhamayn ayuu maamulihii dhinaca iga soo istaagay, markaas baan ku idhi bishaarayso fursad baa kusoo doonataye. "Naa maxaad leedahay?" buu cod adag igu yiri saan tusay warkii ay qoreen ciidanka maraykanka Los Angeles ee ay ku dalbanayeen qofkii u keena warbixin ku saabsan qoftaas oo gacan ku dhiigle ah in ay Abaal marin lacageed siinayaan. İntuu qoslay buu yiri ma qoftaas baad taqaanaa qolka 17aad bay kuu degantahaye saad ula macaamilayso adaa yaqaan ayaan iri oo ka dhaqaaqay. Anoo ujeeda ayuu taleefanno iska batay wacwacay. Xoogaa aan badnayn kadib waxaa meeshii yimid Askar qalabaysan sakamo gudahood baana Barbara lagu qaatay oo gaariga ciidanka lagu riday aniga oo arkaya.

Dadkii meesha isa soo tubay waxaa kamid ahaa wiil muqdisho ka yimid oo lahjadiisa aan ka fahmay, cabbaar baan isla kaftannay dabadeedna u wada dhaqaaqnay dhanka huteel uu ii sheegay in uu deganaaa.

DHAMAAAD.